مركز الكتاب للبحوث والدراسات | بوصاصو – الصومال

2019أبريل

TAXANAHA KASMO & KASIIS – QAYBTA 4aad

ABWAAN MAXAMUUD CALI AADAM HOORRI

TAXANAHA
KASMO &
KASIIS
QAYBTA 4AAD

Abwaan,

Maxamuud Cali Aadan Hoorri Gacan-yare

TUSMADA TAXANAHA
KASMO &
KASIIS
QAYBTA 4AAD

1. **UJEEDDO**
2. **HORDHAC**
3. **SOOYAALKA DHIRTA**
4. **SOOYAALKA AGABKA SOOMAALIDA**

TIXRAACA TAXANAHA KASMO & KASIIS QAYBTA 4AAD

1. **DIWAANKA DUR-BAAN GARASHO** .CABDUQAADIR CABDI { SHUBE}
2. **DIIWAANKA HABE HAL-ABUUR IYO HOWRAAR"** MAXAMUUD CALI AADAN { HOORRI}
3. **SAMA-DOON:** WAXA QOARAY ABWAAN ISMAACIIL*YUUSUF CABDI " JIHEEYE*
4. **DIIWAANKA" DURBAAN GARASHO.** WAXA QORAY: ABWAAN CABDULQAADIR CABDI SHUBE
5. **WARAYSI AAN LA' SAMEEYEY** , AABBE CALI AADAN HOORRI GACAN-YARE
6. **WARAYSI AAN LA'SAMEEYEY,** ABWAAN CABDIRAXMAAN CALI FAARAX DHIIRANE

UJEEDAKA TAXANAHA KASMO &KASIIS

Ujeedaka Taxanaha **KASMO &KASIIS** waa mid ka dhashay muddadii aan ku dhex-jirey shaqada "**Wax-barashada"** waxa aan u hubaynaya ama ku Abaalaynaya Taxanahan, Ardayda soomaaliyeed ee wax ka Barata Dugsiyada dhexe, Dugsiyada sare iyo Jaamacadaha ka dhisan dalka soomaaliya.

Wax aan qirayaa inaan u Baahannahy Olole xoog leh, oo lagu baahinaayo Aqoonta Af-ka iyo Dhaqanka suubban, jaalle waxa aan qirayaa inaan Af-ku qabyo ahayn ee Aqoontu ay qabyo tahay, and Taasuna waa midda keenaysa inaan suudameedka u xidhano sidii loo helilahaa kasmo iyo Kasiis ku dhaadan garasho iyo gudasho buuxda.

Taxanahani waxa uu buuxin doonaa kaalin mug leh , ***Misciriir "miscilil***" bannaan , sidoo kale waxa uu Raar u Noqonaya Gortimo aan laga gubikarin , oo weliba u baahan in loo yagleelo Raar si loo helo waddo Maaro ah , oo markaa si sahlan looga gudbi karo, jaalle dhaqanku waxa uu u baahan-yahay Oollimaad Cilmiyeesan iyo Degel baadh ku qotoma Raad-raac iyo u guurgal Aqoomeed, Markasta oo Aadanuhu uu ku dhowaado Kadimada Aqoonta waxa uu u dhowaanayaa hilinka Nolosha iyo hab-raaca loogu noolyahay

HORDHAC

Taxanaha ***kasmo &kasii*** tirsigiisa 4aad , waxa aan ku eegaya jaalle riciradan soo socda oo kala: ***sooyaalka dhirta , sooyaalka Agabka soomaalida*** , inagoo iftiiminayna ama ku turun-turooneena wixii aan ka garano. dhirtu waxa ay ka mid tahay hantida ay leedahay soomaalidu, waagii hore waxa ay dhirtu ku jirtey kaalinta koowaad dhanka nolosha iyo dhaqankaba , waayadan dame jaalle waxa muuqata in loo guntadey qaabkii loo xaalufin lahaa dhirta.

Sidoo kale jaalle waxa aan ku eegaya tirsigan wixii aan ogaal iyo aqoon ka gaarno ***{agabka soomaalida}*** soomaalidu waxa ay lahayd jaalle sanco ku qotonta farsamo iyo farshaxan buuxa, waa hagaage jaalle waxa aan u baahanahay oollimaad iyo olole lagu baafinayo agabka soomaalida.

waxa aan ku soo qaadanaya hordhacan maanso aan curiyey 5-12-`2015 , waxa aan kaga hadlaya qiima dhaca lagu sameeyey dhirta , jaa waa ***geedkii laquursaday*** ! oo hadlaaya cabbiraaya dhibka loo geystey ! waa kan jaalle leh : ku maan ahay! waa maxay u jeedaaddu? “hadalka dhayda ka cadday” ! magacaygu waa gee , geed gaasiraan ahay! ogow waxaan ahay caawiye aan la’ogayn , kaa soo u baahan hiil ***“qaran” iyo hoo “waayeel”!*** waa hagaag ! igu soo dhowow aan gaa-gaabsi kuugu sheegee waxa ka guuxaaya dubaaqayga iyo damiirkayga garasho, “hiil waa hiil” “tacabna yeelkii”

Gallad” waliba Ehelkeed
Guul” waliba Dowgeed
Gego” waliba luuqdeed
Gocor” waliba sebenkii
Guurti” waliba Doodeed
Gammaan” waliba Orodkii
Geel” waliba Socodkii
Gidir” waliba Xoorkii
Gur-gurshaa” Minqaadkii
Geed” waliba Hooskii
Garaad” waliba Dhimirkii

Garashona” yagleelgeed
Waxaan uga Goleeyahay
Geed la quur-sadaan ahay
Gabayaa Af-kala qaad
Geeraarshihiiyow!
Maadigaa hal-kaagii gabay
Mase Waa Gartaayoo
Wax ku Gaasiraajidha
Maya waa Gardaranahay!
Saryan Gees xunbaan ahay?
Geenyo hebeda loo dhigo!

Afartaa Geddaydiyo
Dheha Gocoshadaydii
Geed la quur-sadaan ahay
Aan Galab-carroownee
Owrka Gibilka Noosaar
Waa Guri la'gubayoo
Bahaluhu ka Guuxaan
Godxunbaan u hoydaa
Garan-goorri lagu Gubay
Dulinkuna Gun iyo hoos
Guunyada ku cirintiro
Gafanaan laderis ahay
Aan wada sar-Goynee
Ila Garo Geddaan rabo
Sida webi Ganaanoo
Geesaha u kala Baxay
Gufaacooyinkii Mari!!
Ama Dir Gu' hooroo
Dhowr Godol irmaanaa
Guulaamo Roob kici!

Geddakale waxay tahay?
Gurboodkiyo Dhallaankiyo
Ganbooleyda dumarkiyo
Garcaddaale Odayada
Gaarsii sidaan ahay!
Gaagaabsi ugu sheeg
Inaan ahay Gasiin dhaba
Xilli Gaajo Badantahay
Geydhadu dul Gubantahay
Giindhadu silloontahay
Adhigana la Gowracan
Dadku waygu Gaataan
Gabanadaa Ihaybsada!
Miraa layga Guran jiray

Maantana waxaan Gudo?
Ama hiil waxaan Galo?
Miyaad Garan kareysaa?
Afartaa Geddaydiyo
Dheha Gocoshadaydii
Geed la quur-sadaan ahay
Gudbi oo ka sii soco!
Giraangiri waxaan rabo
Adigoo Garaaddo leh
Garta meel ka wada Goy
Gacalkana la' haasaow
Garashadana igu hubi!
Gaagaabsi ugu sheeg
Bir ma' Geydo inaan ahay
Inaan ahay gabbad dhaba
Guunyadu ku hiratee
Geddakale waxay tahay?
Aadanow gefbaa dhacay
Garangari ma'roorbaa
Geyllan dumar doogaa?
Gaaggaxo ma'dararbaa?
Geelwaaq ma'daranbaa?
Geeraar ma'gabaybaa?
Guuroow ma'heesbaa?
Gayradaac ma, subaxbaa?
Gowricis ma, nololbaa?
Garwaansigu ma'gaajaa
Gardho geel ma'suufbaa?
Galtinnimo ma'diidbaa?
Gelbis dhacay ma, reenbaa?
Galoof geel ma'ramagbaa?
Xiddiggii gal-gaalbaa
Galowkooma keenee
Gabbal dhiciyo waaberi
Gocashaan ku suganahay

Ninna Gaar igama hayn
Ninna Godin igama Deyn!
Ninna Qodax igama Gurin!
Hadaba galabtiyo wax hore
Diiwaaanka galgiisa furay
Markaan geed mirood iyo
Galool mudan ahaan jirey
Ama gomonshe miidliyo
Gob- macaan ahaan-jirey
Gudbe maalmihii hore
Guluf iyo col bay helay
Guxushaa u weyn yahay
Talo wuxuu gorfeeyoba
Gowsaha is-dhaafshoba
Illey waa Garaad-xume
Goobtuu is-taagoba
Dadka wuxuu gooyaa
Xujo garab ka dhigayaa
Geedahaa ilaahaay
Geyigeena Buuxshee
Asay uu miciin galay
Ma' gefbaan ku gelayaa?

Haddii aan Gumaadoo
Guuto aan ku kiciyoo
Gabanada ku soofsho
Gamasyada uwada tumo
Gurtun melena kaga tegin
Dabadeed gabbaloyo
Geyigii la'degijirey
Guban iyo abaar galo

Hayeeshee Bal-Googaa?
IGa-gunud u jeedadaa!
Hal-xiraale Gaammuray?
Gacalka aan u sheegnee?

Waa maxay gahayroow
Gaabisada haweenkee
Gurigeeda laga falay
Gaadhi soo kiraysoo
Markay geniyo dhiibtona
Dhirta geed ka reebay?

Waa maxay gahayroow
Iyadoo gu' lagu jidho
Geelu Badina uu dhalo
Ramaguna guryaha yaal
Dhuxushaa gureysaan?

Waa maxay gahayroow
Dhaqan guur nagu dhacay
Gu'gu maalintuu da'o
Dhulkii giigsanaajirey
Guunyada dhammaanteed
Guri laga furi-jirey
Markii guur yimaadona
Gabdhaheena hodonka ah
Geel lagaga Bixi-jirey
Gelbis uu ka dhici-jirey
Sange lagu gardaadshiyo
Googooska Quruxdiyo
Ashaqaraar la'gu ijirey

Waa maxay gahayroow
Gaarigaa la dhaafsaday?

Waa maxay gahayroow
Geel raashin lagu qoro?

Waa maxay gahayroow
Gaal maciin labidayaa?

Waa maxay gahayroow
Gabanadan tahriibta ah

Waa maxay gahayroow
Geyaankan lagaramay?
Oo aan laga gilgilanayn

Waa maxay gahayroow
Nimankan gujada wada
Gafuurkooda qariyee
Is gadoodsha dabadeed?

Geed-yohow bal Geeloo!
Geed -hoyow la Gaasiray
Geed-yohow la Dhaawacay
Geed-yohow la Quursaday
Geed-yohow la Eersaday
Geed-yohow la Agabtiray
Geed –yohow hu’ gii dhigay
Geed-yohow gadoodsani
Oraah Gaammuraa tidhi
Gujoo laysu qariyaa
Gacma, Daalis weeyaan
Aan kuu Garaabee
Gartaa aan ku siiyee
Gebigeed Adduunyadan
Guryasama laga degay
Gundhigeeda Xaajada

Ninba Geyi ha sheegtee
Ama Gobol hajoogee
Geesaha markaan Da’yey

Garashana Gun uga dhigay
Miisaanka Gabaygiyo
Milgihiisa Gocashada
Anigoo ka Gaggixin
Ama Godol macaantirn
Adigana ku Garab Marin
Dadku waa Gun badatiyo
Gob-yaraatayweeyaan

SOOYAALKA DHIRTA

Dhirtu waa jaad ka mid ah makhluuqaadka eebbahay ku uumay dhulka gorgiisa, waana hal-bowlaha nolosha aadanaha iyo duunyada ku dhexsocota dhulka oogadiisa, dhammaan san-kuneele oo idil waxaan shaki kujirin in uusan ka maarmikarin ku xirnaanta dhirta iyo ku tiirsanaanteeda, soomaalidii hore iyo quruumihii soo maray adduunka dhammaantood waxay ahaayeen kuwo ku dhaaadaan dhirta oo ka hela: miro, cunto, hu' ama dhar, hoy ama gabbaad, agab ama qalab, hub iyo saanad, weel , isagoo tilmaamaya abwaan ***cali cilmi af-yare*** waxa uu yidhi:

Adigoo dhalandhoolayoo
Dharaartu ay kululaatayoo
Dhafoorkaagiyo jiidhka,
Dhididku uu qulqulaayoo
Dhalcaddaad ka gashaayoo,
Dhirtu waa nolosheenna
Qabow dhuuxa laftaadiyo
Dhogortaada dilaayiyo
Dhaxantay kaa celisaayoo
Dhanbal aad huwanaysiyo
Dhar bay kuu noqotaayoo,
Dhirtu waa nolosheenna.
Marna dhuuni la quutiyo
Dhuguc aad u bislaadiyo
Midhay kuu dhalayaanoo
Dhibtu kaaga hadhaayoo,
Dhirtu waa nolosheenna.
Dhulkoo roobku ka raagayoo
Abaar laysku dhammeeyaa
Dhaameelkoodiyo xaygiyo
Dhimbiishii ku qabowday,
Dhaayinkay bixiyaan baa
Reerku kuu dhacartaayoo,
Dhirtu waa nolosheenna.
Dhafkaa hawdkiyo soolka,
Hadday dheer tahay ooddu,
Dhoolla-weyne libaax iyo
Dhurwaagii wax cunaayiyo
Dhawrtu soo Mari maysoo
Waa dhis aan laga maarminoo,
Dhirtu waa nolosheenna.
Marna dhuub la xiddeeyiyo
Dhigtii laysku maraayiyo
Udub dhiig cas la moodiyo
Dhenged aad u qurxoon iyo
Xabag kuu dhadhamaysiyo
Wax uun baad ka dhuratayoo
Madhax weeye dhitaysanoo
Dhirtuwaanolosheenna

dhirtu "[1]" waa lafdhabarta uu ku tiirsanyahay aadanuhu iyo xoolaha kaleba, hadaba waxaa la ogyahay d hulka leh dhirta in uu ka waansan yahay dhulka kale, taa soo laga helo, qurux, dugsi, ama laga samayyo dhirta daawo, agab, iyo wixii

[1]: waxaa loo qaybshaa dhirta Afar qaybood oo waaweyn .geed mirood, geed quwaax, geed qodxeed,geed madow

la’halmaal, sidoo kale soomaalidii hore oo ahayd dad ku nool dhul bahgooyo ah, iyagoo ka hel jiray dhulka am aka dhigan jiray , baadka biyoba, huga,hoyga, marashada, quwaaxaysiga iyo qaraabka,waxaa jirtay dhirfarabadan oo lagu tiirsanaa dhammaan qaybaha nolosha isda: ***geed quwaac, geed mirood, geed xabkeed iyo geeed leh jilif ama jilay***.

DHIRTA XABAGTA LEH

Qaydar: waa geed qodxeed, oo leh xabag macaan, **Qurac**: waa deed ku badan dhulka kana yaray damalka, **Damal**: waa geedku badan dhulka lehna xabag miid leh, **Cadaad:** waxa ay ka baxdaa baadiyaha macagta waxa ayna leedahay xabag miid-badan oo loo adeegsado daaweeynta cudurada.

DHIRTA LEH CAANAHA AMA CANNANAD

Moxor: waxaa laga guraa beeyo, **Maydi**: waxaa laga guraa beeyo, Xiis: waxaa laga guraa murkud, **Geedgaal:** waxaa laga guraa falax-flax waana beeyadoo kale ah, **Dhidin**: waxaa laga gurtaa “muurre” ama “mal-mal”

DHIRTA LAGA HELO MIRAHA

Qaybtani waa qaar ka mid ah dhirta laga helo miraha, ku waa soo lagu doogo xillyada ay jidho abaarto, sidoo kale waxaa lacunaa xilliyada barwaaqada, waxaana ka mid ah kuwan soo socada

Gob: waxa uu leeyahay Miro guduun oo laf leh, waana geed aad iyo aad umiro macaan. Soomaaliduna sigaar ah u ilaashaan, waxaa kaloo laga helaa ama lagadhigtaa qasil ama sidri

Gobonshe: waxa uu leeyahay Miro, macaan.oo gal leh, ku waa soo ku laran dhareer iyo qoyaan faraweyn, waxaana aad u jecel caruurta iyo gungubaha.

Dhafaruur: waa geed ka baxa dhulka aadka ukuluul, oo leh miro guduudan, macaan, miid leh, lakeydiyo xilliyada abaarta, waxaan ku jidha mirihiisa lafo jilicsan oo ku burbura gowsaha.

Murcanyo: waa geed gaagaaban oo kabaxa meela banaanka ah oo leh miro jilicsan oo labo-labo isku dhegan ama afa-rafra waxa ay leeyihiin dhareer ama qoyaan ku maran, macaan iyo miid.

Murcud: waa geed kor u baxa, oo leh Miro buur-buuran, macaan, lafleh iyo miid aad iyo aad ubadan, waana geed halis ah waayo waxaa had iyo jeer deris la' ah gungumaha, abeesada iyo wixii la'hal maala.

Rooxo: waa geed ku dhafan dhirta kale oo aan keli bixin, waxaa uu leeyahay Miro marka ay qararka[2] yihiin u eg qaraha oo yar-yar waxa uuna ku bislaadaa geedka dushiisa ama qararnimadiisa oo dhulka lageliyo.

Xamur: geedkani waa geed Miro macaan had iyo jeerna ka baxa meelaha siman iyo jeexyada, waxa uuna leeyahay Miro laf leh, qaybihiisa waxay kala yihiin, *xamur macaan, xamur dawaco* waana ka aadka u mira qaraar

Timir: waa geed ka baxa meelah kulul, aad iyo aadna ucimri dheer, waxa uu leeyahay Miro macaan, oo ku baxa waqti iyo kal u gaar ah

Gud: geedkani waa geed aad iyo aad uga baxa gobolada mudug ama dhulka carra casta ah, waxaana laga helaa Miro loo yaqaano "yicib"

Berde: berduhu waxa uu leeyahay Miro, buurbuuran, macaan, waxa uu ka baxa dhulka buura leh, togagga, nugaasha ama dhoodida, waxaa kaloo laga helaa mayrax ama dhuub, waana geed quwaax.

Daray: geedkani waa geed leh higil iyo humaaag aad iyo aad u muuqada, sidookale waxa uu ka baxaa dhulka Bahgooyada ah, had iyo jeer waxaa uu can ku yahay in uu kabaxo dhuuxyada, togagga, biyamareenka, jeexyada, dedibka, waxaa cuna mirihiisa dadka, daayeerka iyo xayawaano kale, waxa uu leeyahay caleen waa weyn iyo jirrid ballaaran, sidoo kale waxa uu laayahay *cannano ama caano* sida berdda ha

Dhebi: geedkani waxa uu ka baxa dhulka buuraleyda ah, waxa uuna leeyahay qaybo kala duwan sida *dhebi cadde*, *dhebi madoobe,* waxaa laga helaa ama laga gurtaa, Miro macaan, ulo, dhigo, han-goolo iyo wixii la mid ah.

[2]:ceeriin ama aan bislaan

Shoy: geedkani waxa uu kabaxaa buuraha cal madow, waana geed aad iyo aad umiro macaan, waxaa jecil oo had iyo jeer kulaaya dadka *"shabeelka'* geedkani waxa uu ubaxaa kor ama waa geed dheer oo yeesha laamo farabadan, mirihiisu waa madow khunti ah, waxaa laga qaadaa xanuunka "*daba dhiigta"* ama shuban

Mareer: geedkani waa geed layaab leh waan geed quruxbadan, oo kabaxa meela togagga ah, buuraleyda, dixda, waana geed Miro macaan. Waxa uu leeyahay miro *guduudan, yaryar, dhareer* leh, miid leh, u wanaagsan *xaglaha* iyo *lugaha dadka* waa wayn .

Canjeel: geedkani waxaa uu ka baxaa ama ku badan yahay gobolda bari ,sidoo kale waa geed facweyn , oo uu cumrigiisu aad iyo aad uraago , waxa uu leeyahay miro badan oo buur-buuranwaxa uu bixiyaa *xay* ama *man* oo ay aad ujeceshaahay *shinnidu*, waxa ayna ka samaysaa *malabka* ,miraha canjeelka waaa lacunaa, waana geed miro macaan,waxa uuna maraa qaybo kala duwan .

Garas: geedkani waa geed ka baxa dhulka looyaqaan macagta iyo meelaha loolka leh, waxa uu leeyahay *caleen, laamowaaweyn,* waxaa laga helaa ama laga gurtaa *Miro*

Caday: geed Kan mirihiisu horay uma bislaadaan, waxaa jecel daayeerka oo dushiisa seexda habeenkii, waxa laga gurtaa caday.

Milxiddo: mil-xiddadu waxa ay ka baxdaa buuraha cal-madow waana geed aad umiro qaraar, *had iyo jeer* waxaa cuna *daayeerka*, mirihiisu waxa ay u egyihiintimirta dhanka .*samysaka, dhererka, joogga, dhacaanka, miidda, muuqa*, waxa uu can ku yahay qaraarka iyo dacarta saran mirihiisa, carruurtu waxay ay ka qaadaan *"daba dhiig"* waxaana la cunaa xilliyada ay jidho *baahidu ama abaarta*, waxaa uuna baxaa xilliyada kala guurka ama laka *hayaamo* oo ku aaddan waqtiga abaarta

Berdayaro: geedkani waxa uu ka baxaa meelah uu kabaxo berdduhu waana geed ka gaaban berdaha, kana tayo liitadhanka *mirha, muuqa, malaha dhuub iyo mayrax* sida berdaha waxaa laga helaa *miro gaagaaban ama yar-yar*, waxaa kaloo laga helaa cannnada lau *marqo xoolaha.*Waxaa kaloo jidha dhir farabadan oo laga qoro agabka sida, *mooliga, daabaanta, deyibka, dharkayka, xagarka*, sidoo kale waxaa jidha dhir laga helo ama laga gurto asalka sida: *galoolka, qaroonta, moxorka iyo wixii la'mid ah*

XIJIGA

waa geedka kabaxa dhulka dal udug loo yaqaano, waana geed facweyn oo soo jireen ah, waxaan shaki ku jirin in uu yahay xijogu midka mid ah kaabayaasha dhaqaalaha ee dal udug, soomalidii hore iyo tan hadda joogtaba waxa yak u tiisan tahay gurashada beeyada ama saraca geedkan, waxaa la sheegaa geedkani in uu yahay geed qiimo weyn ugu fadhiyey dhamman dowladiihii soomaali gumaysan jiray, waayowaa hal-bowle dhaqaale.

Sidoo kale waxaa laga sameeyaaa daawooyin, geedkani waa mid ka baxa buuraha calmadow iyo buuraha cal miskaaad, waxa uu kala baxaa geedkani laba qaybood ookala ah , mayddi *(yagcar*)

Maydi: waa Kan gaagaaban oo ka baxa buuraha *cal madow,* waana geedka caanaha badan, ama madi ah, waana ka qaalisan yahay Kan kale, geedkani waxaa uu ka baxaa had iyo jeer dhadhaabaha iyo meelha gaagaaban waana ka howl yaryahay moxorka.

Moxor: geedkani waa geedka ka baxa buuraha calmadow ama meelaha dhaadheer sida: *jararka haadaamaha*, waana ka caana yar-yahay maydiga ama waa ka raqiisan-yahay dhanka *qiimaha, tayada, xabagta*, *saraca*, *badeecadda* iyo wixii lahal maaha.

AGABKA XIJIGGA OO KOOBAN

Mingaaf: waa walaxda lagu sarco geedka ama lagu jaro xabagta, waxaana loo sameeyaa daab laba dhinac leh ama laba gees le ah, **Dhuraad**:waa walax yar ama kolay kooban oo geedka lagaga soo qaado xabagta, lagagana wareejiyo markuu buuxasamo midka weyn , **kolay:** waa walaxa lagu biiriyo beeyada ama xabagta geedka oo maalintaa lasoo gooyo, **Kefed:** kefeddu waa ka weyn-tahay kolayga waxaana la dhigaa meel *hal-bowle* ah oo waxaa lagu ururuyaa dhammaan wixii lasoo gooyo maalin soofka , **Malawiyo:** waa maryo calal ah ama basas ah oo lagu guro xijoga

HEERARKA IYO HABKA SARACA

Waxaa jira heerar uu maro geedka xijigu marka lasarcaayo waxaana ka mid kuwan soo socada

Calaamad-nagaf-waa saraca ugu horaya oo lagu soofo xijiga ayaa loo yaqaan magacyadan iyo kuwa kaleba

Qolof qaad: waa marka labaad oo lagu soofo geedka ama laga qubo qolofta Xijoga, qolof **qaad labaad:** waxaa looyaqaan marka labaad oo geedka la'qolof rido ama laga daadsho qolafta.

Candhadhig: waa marka uu geedku bislaado oo caanaha daadsho, amauu xabagta ka tuuro dhinacyada ayaa loo yaqaan magacan

Kal: waa muddada u dhexaysa laba sarac ama labo qolof rid, **Kalkal**: waa markuu kaabiga soo saaro waqtigii saracu dhowaa ama lagoynlahaa xabagta, **Caddillan:** waxaa loo yaqaan markuu geedku dhaafo kal-kiisa **Cawlalood**-ceeriin-waa marka uu geedku uu san diyaar u noqon qolof qaadka.

Cogor: waa xijiga oo ka raga saraca uguyaaran laba sano iyo wxii lamid ah.

1. **Raas**: waa raashnka xijiga oo ay dheefsadaan dadka gura xijiga
2. **Cawaaji:** waxaa loo yaqaan " maqdac" oo ah kirada xijiga
3. **Xoog-bar**: waa hab ka mid kirada kirada xijiga
4. **Soof:** waa xijiga kooban lagu soo fikaro maal keliya
5. **Laba soof** : waa xiji ka badan kii hore oo qaada kara laba soof
6. **Fadhi**: waa xiji ka badan kii labada hore
7. **Jadar "hool**" wa marka ugu dameeya oo laga hoolo beeyada geedka
8. **Luf:** wa haraaga xabagta iyo luf-lufka ku hara geedka
9. **Faleen:** waa magac guud oo looyaqaan marka ladhoofinayo beeyadam ,murkudda, falax-falaxda, caaryada

Xijigu waxaa geed le dheef, lagana helo hanti iyo maal mugleh, waxa ay leedahay xabgtu qaybo kala duwan, sida: mushaad, mujarwal, fakabiir, fas-saqiir, shooto iyo foox

GUDDA

Geedkan guddu waxa uukamid yahay dhirta sida dabiiciga ah u baxda ASE ah geed abaareed, Miraha geedkan waxa loyaqaanaa "**yicib**"geedkana waa ku dhalad somaliya iyo Ethobiya waxaa se laga beeraa wadamada kenya, **israa'iil**, **tansaaniya**, **suudaan** iyo wadanka yaman

MEELAHA UU KA BOXO

geedkan waxa uu ka baxaa meelo badan oo giyigeena ka mid ah balse waxaaaad laga helaa bariga Ethoobiya "ismaamulka somalida" siiba goboldkadoolo gaar ahaan degmada "Bookh" waxaa kale o laga hela dagmoyin ay kamidyihiin **mareed**, **mirafadle**, **dudun**, **dameer-joog**, afar-**irdood** iyo dagmadagalladi, Somaliya waxaa uu aad uga bax daa gobolada dhexe siiba gobolka mudugdegmada galdogob tuulooyin hoos yimaada sida qansaxle, daarasalaan iyofoocyacade, laga bilaabo gobolka hiiraan ilaa iyo galguduud geedkanwaa uu ka baxaa

SIDA UU U BOXO

waa geed sida dharta oo kale ayuu u biqla abuurkiisa waxaa loo yaqaan "cisalaw" wuxuu noqdaa geed yar oo xooluhu daaqaan wuxuuna ubaxa uguhoreeya saaraa marka uu gaaro 5 ilaa 6 sano kadibna wuxuu isu badalaa sitartiib tartiib ah geed dhamaystiran. Waxayna bixitaanka mirahageekaani maraan heerarkan soo socda:

Ubax: waa marka ugu horaysa ee roobku ku hooro,**Cir-ujeed**: waa marka ay tahay curdan oo ay dhaaftay heerka ubaxa,**Balag:** waa marka aysan wali yeelan beer. Markaas cunitaankeedu waakharaar waayo wali marka la saarmin duubkii iyo qofti uu u samaysna, **Ciddi-libaa**: waa marka uu hoos u jeesto laakiin uu san balag gaarin, uu sanna beer ku tufin, **Beer-kutuf:** waa marka aysan si fiican u yeelan beer,**Uur-guduud:** waa marka uu dhamaystirmo beerku gaarona xiligii goynta,**Dib-uday**: waa marka uu ku daaho geedka oo uu madoobaado, marna ay, dhacdo in uu dhulka kudaato bisayl awgiis waana marka uu ugu macaanyahay waxaan looyaqaan "**jalow",Gees:** waa marka uu leeyahay qolof sare iyo tu kahoosayso oo ladheho "xameeti",**Kalmoon:** waa marka laga qaado qolofta sare o ladheho "**geeska**" lagunareebo xameetida,**Beer:** waa marka laga dhilo qolofta xameetida oo laga dhigo laboqalbac o cad cad oo aad u macaan

QALABKA LAGU GURTO

waxaa jira qalab loogu talagalay in lagu gurto yicibta waxaana looyaqaan "adab" dharka lagu gutana waxaa ladhahaa "**dhaaraan"** marka ladhameeyo guritaanka ayaa la iska tuuraa.

WAXTARKA GEEDKAN

geedkan waxaa loo adeeg sadaa dawaytan cuduro badan sidaxanuunada caloosha "**stomach disease"** kansarka "**cancer"** calool fadhiga **"constipation"**
Maansadan soo socota waxaa curiyey abwaan ***cabdulaqaadir shube***, waxaa uu ku ilaafayaa qaar ka mid ah dhirta iyo qiimaheeda kala duwan waxa uu yidhi saatan:

Dhiroon qariyuu lahaa

Galool dhamacluu lahaa

Dhuux madow qurac buu lahaa

Dhaameel damaluu lahaa

Meygaag dhahriyuu lahaa

Dhallaag shilin buu lahaa

Dhegweyn dacaruu lahaa

Dhuumood iyo wacarri iyo

Dhummayo dugsi luu lahaa

Dhuyuca howd buu lahaa

Medhace lebi buu lahaa

Yaaq dhumuc weyn buu lahaa

Waqay dhamasuu lahaa

Dhalool u bax luu lahaa

Dhur miri saartuu lahaa

Dhuubaan daray buu lahaa

Cajeel dhugucuu lahaa

Berdi u dhigan buu lahaa

Dhullaxa garas buu lahaa

Gud dhiin u eg buu lahaa

Dhuux adag xeeguu lahaa

Dhigaal hohobuu lahaa

Dhafaruur dhibca miidaliyo

Gobiyo dhebi buu lahaa

Dhallaynimo heeluu lahaa

Sadkaxa dhowr midaba iyo

Rooxada dhunkul uuluxdiyo

Aneexo la dhuunyadiyo

Marooro dhanaan yarliyo

Gocoso dhay loo filiyo

Waanboo dhereguu lahaa

Intaa soo dhiri ahayd

Dhulkaykan hiduu lahaa

Dadkii dhaqaybuu lahaa

Ku dhaadan jiruu lahaa

Dhakuunsanayuu lahaa

Badiba dhintay buu lahaa

Dhif yari ka haray buu lahaa

Iyana dhibban buu lahaa

Wixii dhumay buu lahaa

JAAN TUS KOOBAN OO KU SAAN-SAN

Diraasad ku aadan dhirta kabaxad buuraha (calmadow) qaybaha baadka kabaxa dhulkaisku day inaad qeyxdo qayabahan soosocada: *doomaar, dureeme, sifaar, caws, bal, gocoso, burlab, yamays, duur, garrogargaro, fir, uurweyn, burdigaale, gadoomaad, digood,*
gabaygan soo socda waxa uu ka mid yahay suugaanta yaabka iyo mucjisada leh waxa uu diiradda saaraya qiimaha dhirta iyo qaayaha ay leedahy , waxa aan ka qoray nin dhalinyaro ah oo eebbahy ku manaystay xukmad iyo murti waxaa waa nin warsangeli ah gaar ahaan "heesha Reer saalax" waxaa magaciisa la dhehaa ***Abwaan cabdiraxmaan cali faarax dhiirane*** taariikhu markay ahayd ayaan k aqoray ***13-7- 2017*** waxa uuna yidhi saatan :

Maxamuud dhawaanow**"cali[3]"** waa meheradeenee.e

Mulkikuu ilaah dhigay jannaa lagu, masaalaaye

Waa maata koris dhaba nin kii maalikarayow.e

Mucjisaadka buuraha haddaan, dhab uga maansoodo

Muunada jawigu waa qabow lagu maqsuuudaa.e

Madiixa iyo cayryaantu waa moodda galabeede

Moqoradii xasowga biyaha muguci jiifaane

Moos iyo canbbe iyo waxaa ka baxa Miro qudaareede

Diyib muray manqaari iyo shey moore iyo aaxo

Mareerka iyo wegerka iyo dhebiga wada magoolaaya

Hamurka oo muraha lagu cusho iyo mooliga iyo dheenta

Madkarta iyo siraarta iyo yamxadad la'isku maageeray

Bal maroodi ruugga iyo dhasaqa midbaka keenaaya

Maayeerta iyo gaatirta iyo salamacdoo muugleh

Maraaga iyo casaasada dhigruhu, meesha kula yaalo

Murcanyada iyo ayaahadu waa lamabo mataanoode

Moxorka iyo maydigu ka badan kuman malyuumaade

[3] : waxaa loola jeedaa buuraha cal madow

Mirrrowga iyo saynsayga iyo midabka booodaarta
Mirriqsiga xalmuusha biyeys muruqle oo raacday
Man waraabir bixisay iyo dhalool ubuxu muuunayey
Murjista iyo adaahida shinnidu malabka beereyso
Muqlada iyo qaroontaa xarrago loo dhex marayaaye
Meygaaga baxay iyo gobkoo miro cas siidaayey
Miskiga iyo cillaanka iyo cadaad xabagtu miidayso
Milxiddada iyo gowlaalahaa lagu mabsuudaaye
Magacyada dhirtaan sheegay oo maanka ka xusuustay
Iyo toban malyuun oo kale oo meesha kula yaalla
Manfaaciga ay leedahay haddaan qaybku maqashiiyo
Malmalka iyo beeyada ku Taal maydiga iyo fooxa
Murkudda iyo falaxfaalaxda iyo caaryo laga miso
Madagtoo dab laga dhaliyo oo lagu muraad oofsho
Mariidkoo colaadaha waramaha lasysu marinaayo
Musareen haddaad aragtid iyo mir iyo duufaane
Macayaan godad ah bey leedohoo, maalku kuu galo.e
Moobeel majirin iyo casriga laysku maamulo.e
Madar odayga joogaa hadduu cid umuraad yeesho
Mugdi wuxuu ku guurayn intuu deeb mullaaxsado.e
Maadooyinkani waa waxaan cid ka maarmayne
Maag-maaga buuraha Nin jecel wow macna la’aane

1) milxiddo.	52)qalaanqal
2) wager	53)duqay
3) shoy	54)dankuug
4) berde	55)faacool
5) berdeyar	56)dhuur
6) dhicir	57)qaalmalugud
7) xiis	58)jaleelo
8) cobol.	59)caraacar
9) mooli	60)xiirin
10)dharkayn	61)soone
11)dhasaq.	62)dufnood
12)cadaad	63)cayo
13)sarmaan	64)kabaqoys
14)dhamas.	65)yamaarug
15)damal	66)maraa
16)qurac	67)maayeer
17)qansax	68)xeesyeelo
18)daabaan	69)geed gaal
19)carmo	70)falaxfax
20)murcud	71)xagar..
21)moxor	72)xagagar
22)maydi	73)ceeqad.
23)qaroon	74)qarraro
24)bilcil	75)qaroon
25)adaahi.	76)barrow
26)mareer.	77)dhumay
27)dhebi	78)weylasubke
28)murcanyo.	79)yabxadad
29)dhafaruur	80)hoos uhar
30)xamur	81)balanbal
31)gob.	82)huwan
32)gumar..	83)geedxamar
33)qalaanqal.	84)dhaadi
34)tarraxo.	85)ilcas
35)salamac	86)jidiid
36)hunbul	87)weyrax
37)ilkacaddays	88)gubungub
38)maroodiruug	89)hareeri
39)docol.	90)higlo
40)gudda..	91)caday
41)mooli.	92)saar
42)dheen	93)marmareersan
43)daray	94)marqafur
44)dhuumood	95)laamanlooyo
45)geed gaal	96)jiic

46)gaacir 47)baynax 48)oodkaco 49)qodaxlooloho 50)yooco 51)garska	97)maqaari 98)barrow 99)qadhajaa 100) warwar 101) deyib 102) xiis

1. ashacad 2. argeeg 3. askax 4. baar 5. baaxuur 6. babaay 7. badhi-booto 8. bal 9. balanbaal 10.barde 11.barkin dhurwaa 12.baxar saaf 13.beeru u eke 14.beeyo 15.biile 16.bilcil 17.bisiq 18.booco 19.booga dhaye 20.bugle 21.buhood 22.bun 23.cadaad 24.caday 25.cagaar 26.canbe 27.canjeel	101. madheedh 102. madheedh qoox 103. majabe 104. malmal 105. mandooye 106. maraa 107. marmar 108. mawe 109. mayay 110. maxaansugaa 111. may subag 112. maygaag 113. midhafur 114. mirdhis 115. mirimiri 116. moos 117. ontor 118. qabo 119. qadow 120. qalaanqal 121. qalfoon 122. qansax 123. qarari 124. qare 125. qare dameeraad 126. qaydar 127. qudhac

28.carmo	128. qundho
29.cayo	129. raqay
30.ciid	130. ridhmo
31.ciin	131. sabansabdho
32.cilal	132. salaalmaco
33.dacar	133. sarin
34.dal	134. sarmaan
35.damanyuluq	135. sarmaanyo
36.dano	136. siiq
37.dareemo	137. tawaad
38.dhafaruur	138. timir
39.dhagmaanyo	139. tincad
40.dhamas	140. tiin
41.dhammaajo	141. tukelalmis
42.dharkayn	142. uneexo
43.dhay	143. urundhi
44.dhebi	144. wacanri
45.dheen	145. wadhi
46.dhidin	146. washaaqaar
47.dhigri	147. xagar
48.dhiigsaar	148. xajiin
49.dhikil	149. xamakoow
50.dhirindhir	150. xamudh
51.dhunkaal	151. xangeeyo
52.dhurbo	152. xankookib
53.dhuundhas	153. xaskul
54.dhuur	154. ximre
55.dhuuse ure	155. xoday
56.dhuyac	156. xule
57.digir	157. xumboox
58.dixi	158. yaanyo
59.doofaarqod	159. yaaq
60.doonbir	160. yamaarug
61.duur	161. yicib
62.faramog	162. yucub
63.gaad	163. galiile
64.gabaldaye	164. galool
65.gabro	165. gasaangas
66.gacandhi	166. gawlale
67.gahaydh	167. garawle
68.geed-hindi	168. geedharag ashacad
69.gob	169. askax
70.gogobe	170. bacalol
71.gomashe	171. bacaroor
72.goosay	172. carmo

73.gubtaanyo 74.gumar 75.gumre 76.hadi 77.handhurwaa 78.hareeri 79.higlo 80.himir 81.hohob 82.ilgeesh 83.ilko caddeeye 84.iriir 85.jadeer 86.jaad 87.jaleefan 88.jaleelo 89.jarmi 90.jeerin 91.jiic 92.jillab 93.kabxan 94.kariir 95.labi 96.liin 97.liin dhanaan 98.like 99.maadh 100. madaxbuq	173. ciid 174. dhaboobo 175. dhafaruur 176. garas 177. gomashe 178. goosay 179. himir 180. hohob 181. ilgeesh 182. jinow/caleenta 183. madheedh 184. maygaag 185. Qaranri/afbuq. 186. tukalalmis 187. uneexo 188. wancari 189. xajiin 190. yicib 191. beeyo 192. caadaded 193. cadaad 194. dhidin 195. foox 196. hadi 197. malmal 198. midhafur 199. xabag hadi

SOOYAALKA AGABKA SOOMAALIDA

Guri baanu leenahay
U eg maabka guudoo
Aan dunida laga garan
"Yam-yam"

Waxa uu ka kooban yahay Aqal soomaaligu qaybo kala duwan oo loo yaqaano magacyo kala gwddisan hadaba aan jaleecno qaybaha Aqal soomaaliaga:

Ded "*saari":*waa wixii wax lagu dedo oo laga saaro aqalka kor ama dusha waxa ayna ka kooban yihiinkuwan soo socada, hadaba iskuaday inaad qeyxdo iyo inaad sheegto waxa ay ka samaysan yihiin, **dermooyin:** waxa laga samayyaa cowada sida mayrada, **caws:** waxa laga sameeyaa dhirata "gargarada", **loomooyin**: waxaa laga samayyaa cawda ama mayrada, **jerco**: waxaa laga bixiyaa saanta geela iyo tan lo'da

Qabax"*qori"*waa waxa uu ku taagan yahay aqal soomaaligu waxaana kamid ah waxyaalahan soosocada, hadaba iskuaday inaad qeyxdo iyo inaad sheegto waxa ay ka samaysan yihiin, **udbo**"waxa laga qoraa dhirta sida, geedka deyibka, **kabaalo**; waxaa laga qoraa dhirta sida: geedka mooliga, dhigaha; waxaa laga sameeyaa dhirata sida: geedka dhebiga, **loolka**: waxa laga sameeya aa dhirta: sida "dhumayga, sifaarka,

Gur-gur *"cugaar"*Waxa loo yaqaanaa wax kasta oo yaalla aqalka hoostiisa waxaana kamid ah kuwan soo socada, hadaba iskuaday inaad qeyxdo iyo inaad sheegto waxa ay ka samaysan yihiin, **haamo**: waxaa laga tolaa cowda ,iyo wxii la hal maala , **dhiilo**: waxaa laga tolaa cowda,qabo , **qufado**: waxaa laga samayyaa cawda iyo wixii la hal maala, **doobiyo** : waxaa laga samayyaa cawda iyo dirqida ,daliigta, **shended**: waxaa loo yaqaanaa boorso, **duubishiyo**: waa maryo lagu duubo cugaarta , **satiyo:** waxaa laga samayya cawda , **xeerooyin**: waxaa laga samayyaa dhirta ,**kebdo**; waxaa laga sameeyaa suufafka ama maryaha

Yeesha: waa xargaha lagu dhiso aqalka, laguna xirxiro dhammaan agabka aan soo sheegay waxaana kamid ah kuwan soo socada, sidoo kale waxaa jira xarkao kale ooloo adeegsado adegyo klae sida rarida, dhaanka, safarka, hadaba iskuaday inaad qeyxdo iyo inaad sheegto waxa ay ka samaysan yihiin, **garar":** waa xakaha loo adeegsado dhismaha guriga

Dhegaatiyo: waa xarkaha loo adeegsado qaarka mid ah dhismaha guriga, **hoosin**: waa xarigga lagu hoosimo ratiga marka la'raro, **xeerar**: waa qaar ka mid ah xarka loo adeegsado dhismaha oo lagaga gadaamo guriga dhinacyada, **cayn;** waa xarigga lagu caynsho awrka ama ratiga.

Bayd: waa xarigga looga dhigo ama lagag xiro awrka surkiisa "baydda", **dhafar**o: waa xarig lagu rara awrka ama ugaar ah , Waxaa jira qalab farabadan oo ay soomaalidu adeegsato had iyo gaaraale, waxaana ka mid ah mid wax lagu cuno iyo mad wax lagu qaatoba, sikastaba ahnoqotee qalbkani waa halbowlaha nolosha ummadda soomaaliyeeyd**,** hadaba iskuaday inaad qeyxdo iyo inaad sheegto waxa ay ka samaysan yihiin**:**

CUNTADA

Waxa ay leedahay soomaalidu agab ugaar ah oo laga samayyo dhirta ka baxda dalka soomaaliya waxaan ugu caansan kuwan: **xeero**: waxa lagu ridan jirey wax allaale wixii raashin ah, **fandhaal**: waxa lagu cunijirey cuntada sida: (malqacadda)

CAANAHA IYO SUBAGA

waxa ay leeyihiin ummadda soomaaliyeed hogor ugaar ah oo ay u adeegsadaan dhammaan meesiyada kala duwan oo laga maalo caanaha, waxa ayna ka samay yaan hogorkaas, hargaha xoolaha, dhirta, sida: cawda, daliigta iyo wixii la halmaala waxaana ka mid ah kuwan soo socda:**gaawaha**:waxaa lagu maalaa geela, **gocayga**:waxaa lagu maalaa lo'da, **dhiilaha:** waxaa lagu dhigta, **doobiyada**: waxaa lagu lisijirey riyaha , **haamaha**: waxa lagu lulaa caanaha riya iyo kuw lo'da , **sibraarka;** waxa loo isticmaalijirey keydka caanaha geela , **qunbbe:**waxaa lagu shubaa subaga ama oodkaca 'muqmad, **qudde:** waa fandhaal loo adeegsado subaga iyo muqmadda

BIYAHA

sidoo kale soomaalidu waxa ay leeyiheen weel ugaar ah oo loo adeegsado biyaha iyo dhaanka, **qaraabta**: waxaa lagu dhaansadaa biyaha lagana sameeya haragga riyaha, **xabka:** waxaa lagu dhaanshaa biyaha "qarbad", **dhikil:** waxaa loo yaqaan xabka "yar", **geddi :** waa xabka aadkiyo aadka u" weyn", **wadaan:** waxaa lagu waraabshaa geela iyo dhammaan xoolaha, **dhoomo**: waxaa lagu shubtaa biyaha

HUBKA

Waxa ay soomaalidu leedahay hub iyo agab ugaar ah oo ay ku diriraan waxaana laga samayn jirey dhirta iyo birta, taa suna waxa ay ahayd farsano ugaar ah sooamaalida, waxaana ka mid ah:

Qaansada: waxaa laga samayyaa dhirta xoodantada ama jilicsan , **leebka:** waxaa laga qoraa dhirta aan dhuuxa lahay **fallaarta:** waxaa looyaqaan fallaarta "leebka" , **warafka:** waxaa laga samayyaa mayraxda berdaha, **dhexdaloolka**: waxaa laga samayyaa mayraxada , **hangoolka:**waxaa laga qoraa dhirta,dhebiga, **baakooradda:** waxaa laga qoraa dhirta , **huurta:** waaa ul laga jaro dhirta oo laxardho ,lana qurxiyo , **budh**: waa ul weyn oo loo samayyo madax ama sur buuran, **garuuun**:waa u lama waxaa loo yaqaanaa budh, **dhebi:** waa ul ama waa geedka laga jaro ulaha .

Dhenged: waxaa loo yaqaan ul yar oo dhuub oo lagu kaxayyo geela**sarwaan**: waa dhenged dhuuban oo la mid ah usha, waxa ay sooomaalidu ku can baxday farsamada iyo far-shaxannimada gaarka u ah waxa ayna samaysanjireen agan ka samaysan bir oo ay gaar u lahaayey ama halala wadaago, waxaase faan ugu filan in ay iyagu samaysan jireen, waxaana ka mid ah ku wan soo socda: **ableyda**waxaa looyaqaan, tooreey, billaawe iyo gol -xob, **faaska**: waxaa laga tumaa birta.

Godinta: waxaa laga tumaa sidoo kale birta", **quraarta**: waa godin yar oo loo adeegsado "qorista", **waran:** waxaa laga sameeyaa ama laga tumaa birta , **gamaska**: waxaa laga sameeyaa ama laga tumaa birta , **gumuca**: waxaa laga sameeyaa ama laga tumaa birta , **taraawilka:** waxaa laga sameeyaa ama laga tumaa birta , **madanada**: waxaa laga sameeyaa ama laga tumaa birta , **minkaafka**: waxaa laga sameeyaa ama laga tumaa birta , **maxaarka**: waxaa laga tumaa birta waana farsamo , **mudaca**: waxaan lagumaa birta sidoo kale waa farsamo

XARAGADA

Waxa jidha agab ay soomaalidu leedahy oo ay u adeegsato xaragada iyo quruxda waxaana ka mid ah ku wan soo socada: **saqfo**: waxaa lagu shanlaystaa timaha waxaana laga samayyaa dhirta, **barkin**: waa labarkada waxaana lagasamyya dhirta, **kashkaash:** waxaa la dhigaa guriga gudihiisa waxaana laga gura "xowska, dankuugga, caleenta moolaga

AGABKA HOWL-QABADKA

Waxa ay soomaalidu leedahay agab ay u adeegsadaan howsha iyo shaqada, guriga, xerada, xoolaha iyo wixii la mid ah sida, **mafiiq:** waxaa laga samayyaa dhirta, waxana loo adeegsadaa in lagu xaago guryaga, **diga-xaar**. Waxaa lagag xaaraa xoolaha digada ama degelka, **aloolka**: waxaa laga samayyaa dhirta waxaana loo adeegsadaa digada xoolaha, **koorta:** waxaan laga qoraa dhirta, waxaana lagu xiraa geela, "**boodaan**" **"xabuub"** "**aleen**" **"aleen xoogle**" (codkeedana waxaa looyaqaan "**dawan**"

Agabka loo adeegsado rarada owrta iyo wixii la'halmaal: waxaa jira agab farabadan oo loo adeegsado rarka owrta, sidoo kale waxaa jira magacyo loo yaqaan agabkaas, hadaba isku aday inaad qeyxdo iyo inaad wax sheegto waxana ka mid ah kuwan soo socad: **lac:** waa sheyka ugu horayya oo lagu heeryeeyo awka, **kebed**: waxaa laga samayyaa suufafak waxaana lagu xejiyaa lacda, **koore**: waxaa lagu raraa awrka marka la dhaaminayo, **dermo**: waxa lagu dedaa aqlka awrkana waa lagu rarar geeddiga.

Dhafar: waa xarigga lagu dhafro ratiga marka lararaayo, **hoosin:** waa xarigga lagu hoomiso jercada awrka, **cayn:** waaa xarigga lagu caynsho awrka "yeel, **bayd:** waa xariga lagu baydiyo awrka "yeel", **dabagelis**: waa xarigga lagag xiro awrkaka badaba "xejiye", **dabar**: waa xarigga lagu dabro awka ama lagu xiro ratiga, **galansi:** waa hoggaanka ama galaaminta hayinka, Jaalle waxa aan ku soo afmeeraya ricirkan maanso uu curiyey ***Abwaan: cabdulqaadir cabdi shube***

Weynaan dhaagine dadyohow

Abkeen dhaqan buu lahaa

Dhabiil tabcashuu lahaa

Dhaqaale gunuu lahaa

Is dheeli tiruu lahaa

Dhismiyo aqal buu lahaa

Dhig iyo udub buu lahaa

Yeel iyo dhafarbuu lahaa

Dhoon iyo kalax buu lahaa

Dhiiloowe yar buu lahaa

Haruub dhoqoluu lahaa

Kor yaal dheeguu lahaa

Tebbed u dhigantuu lahaa

Fan dhal dhumisuu lahaa

Dheriyo xeeruu lahaa

Haan weynuu dhaansadiyo

Biriyo dhakal buu lahaa

Darfacas lagu dhuugsadiyo

Jeex googol la dhigtuu lahaa

Dhanbaal ka yarbuu lahaa

Qayraan dhuun yuu lahaa

Intaas oo dhaabbadood

Intaas oo dhaqanahay

Murwadii dhidibtuu lahaa

Dhammaan tacabtuu lahaa

Dhistee gogoshuu lahaa

Dhaydee asashuu lahaa

Dhaqaalaysuu lahaa

Ku dhaadan jirtuu lahaa

Haddana dhaaftuu lahaa

Wixii dhumay buu lahaa

Dhabeey googgaa markale

GUNAANAD

Jaalle waxa aan soo dhex-maaxney labo ricir oo kala ah: **sooyaalkadhirta, sooyaalka agabka soomaalida,** iyo wixii Eebbi inoo sahley inaan u soo gudbinio dhallaanka soomaaliyeed meel kasta oo ay joogan.sidoo kale jaalle waxa aan ku soo afmeeraya socdaalkan gaaban maanso aan curiyey hilaaddii. 1-3-2015. Maansadani ***Qabatoon***, waxa ay ka hadleysaa dhibaatada qaadka iyo Arrimaha uu ku hayo *Bul-shada soomaaliyeed*, maadaama uu yahay Qaadku geed, inana aan horay uga soo hadalnayn qiimaha dhirta, waxa ayna leedahay sidatan soo socota:

Inuu qaadku qurun yahay
Inuu qaadku hoog yahay
Qoroon gubatey inuu yahay
Inuu qaydar ololiyoo
Qiiq iyo wax daran yahay
Qalbigana u daranyahay
Quruumu ku go ayaan
Taasu waa qiyaas dhaba
Qadaf beena maa hee
Waa qaran go' aankii

Inuu qaadku qurun yahay
Qaran dumiye inuu yahay
Qabiil kana u sahay sahay
Qaxa waa hirgeliyaa
Nafta waa qur gooyaa
Qaadkana mid kii cuna
Qaflad buu ku beeraa
Qaafil buu ka yeelaa
Qoyskuu ka dumiyaa
Qaraabaduu ka gooyaa
Aayadaha qur aan kiyo
Qowlkii rasuulkiyo

Qaafnimaan la barimbaa
Qaad quud ka yeeshee
Qaaddiid hadduu yim
Qardho uu ku sugan yahay
Maxaa loo qayilayaa ??

Ninka qaadka cunayoow
Qowlyar baan ku dhehayaa
Qaanuunka lagu qoray
Qaamuuska lagu daray
Qafladbaa ku sugan tahay
Qahar baa ku sugantahay
Qandhar doqona baat tahay
Qalad baa ku socotaa
Qoryo raamsi garataye
Waadigaa qal-dhacayoo
Duhurkii qaloonbiya
Sida adhi qamaamo
Qalwi beerka geliyee
Bal inaad qundurad tahay
Qajeel waad ka marantahay
Maxaa qaadka kugu raray

Aayadaha qur aan kiyo
Qowlkii rasuulkiyo
Qaafnimaan la barimbaa
Qaad quud ka yeeshee
Qaaddiid hadduu yimi
Qardho uu ku sugan yahay
Maxaa loo qayilaya
Qadakale waxay tahay
Qaaddiid hadduu yimid
Quruumaha lawada shiray
Maxaa loo qayilayaa
Qaadka loo danbidayaa
Laysu qoonsanaayaa
Qadaf beena maa hee
Waa qaran go’ aankii

Ma qaadbaa ma daaqbaa??
Ma quudbaa ma’ quullaa??
Ma’ qaanbaa ma dheefbaa??
Ma’ qoryaha mutuxanbaa??
Ma’ qaroon lashidaybaa?
Ma’ qobcada ladaaqaa??
Wuxu quud ka dheeraa??
Ma ‘xaaraan qayaxanbaa??
Nafta lagu qancinayaa??
Ma’ quraan dhurwaabaa
Qarsoodiga habeenimo
Waxa lagu quraamaa
Ma’qiil baad u haysaan
Maydinkaa qaddarinkara??

Maxamuud Cali aadan hoorri gacan-yare
Jaalle .Amaana Alla